

# **CODADKA IFTIINKA**

**VOICES OF THE LIGHT**

**Qasiiddooyin Eebbe Ammaan Ah**

**Somali Christian Hymns**



**Aweis A. Ali**  
**Translator**



# **CODADKA IFTIINKA**

**Voices of the Light**

**Qasiiddooyin Eebbe Ammaan Ah**

**Somali Christian Hymns**

**Aweis A. Ali**  
**Translator**

---

**CODADKA IFTIINKA**

**Voices of the Light**

**Qasiiddooyin Eebbe Ammaan Ah**

**Somali Christian Hymns**

**First Edition, 2023**

ISBN 978-99990-995-2-3




**Aweis A. Ali**  
**Translator**



**Maandeeq Publishing**

[Maandeeqpublishing@gmail.com](mailto:Maandeeqpublishing@gmail.com)

Jigjiga, Ethiopia



This hymnal has been published under the auspices of the Somali Bible Society. Mogadishu, Somalia.

[www.Somalibiblesociety.org](http://www.Somalibiblesociety.org)  
[info@Somalibiblesociety.org](mailto:info@Somalibiblesociety.org)

ISBN 978-99990-995-2-3

First Edition, 2023

HYMNAL

Copyright ©  
Rev. Aweis A. Ali, PhD  
[amazingwisdom@gmail.com](mailto:amazingwisdom@gmail.com)




Book cover design: Aweis A. Ali

Holy Bible, New International Version®, NIV® Copyright ©1973, 1978, 1984, 2011 by Biblica, Inc.® Used by permission. All rights reserved worldwide.

Kitaabka Quduuska Ah. Bible Society of Kenya, 1979. Revised by SIM in 2008  
Translated by: Aadan Jimcaale Faarax †  
Assisted by: Yuusuf Nuur Ciise & Yuusuf Salaad ††  
Facilitated by: Warren & Dorothy Modricker ††



<b>TUSMADA BUUGGA</b>	<b>TABLE OF CONTENTS</b>	<b>PAGE NO</b>
HAYE AAN AMMAANNO .....	LET US PRAISE HIM .....	1
DUCEEYA .....	PRAY .....	2
CIISE WUU IMANAYAA .....	JESUS IS COMING .....	3
ILAAH AAN BAAHANE .....	THE GOD WHO HAS NO NEED .....	4
ILAAHAY WAA RAXIIM .....	GOD IS MERCIFUL .....	5
KAALAYA AAN AMMAANNEE .....	COME, LET US MAGNIFY HIM .....	5
BAAQIGA EEBBOW .....	THE IMMORTAL GOD .....	6
QORAALKU SIDII UU YIDHI .....	AS THE SCRIPTURES SAY .....	7
GACMAHAAGA NOO FIDI .....	STRETCH OUT YOUR HANDS TO US .....	8
WAXAAN AHAY DEMBIILE .....	I AM A SINNER .....	8
TOOBADDA RABBI .....	REPENT TO THE LORD .....	9
GUULLOW ILAAHOW .....	VICTORIOUS GOD .....	9
XALAY BAAN MASIIXII ARKOO .....	I SAW THE MESSIAH LAST NIGHT .....	10
CIISE WAA MASIIX .....	JESUS IS THE MESSIAH .....	11
NUURKII ADDUUNKA .....	THE LIGHT OF THE WORLD .....	11
AABBOW HANA DAYRIN .....	DO NOT FORSAKE US, FATHER .....	12
BASHIROW MASIIXII .....	THE GOOD NEWS MESSIAH .....	13
BARYADA RABBIGA .....	THE LORD'S PRAYER .....	14
MAANTA NOO MICIIN .....	HELP US TODAY .....	14
MARYAMOO .....	MARY .....	15
QALBIGAYGAA KU DOORTAY .....	MY HEART CHOSE YOU .....	16
INTUU BOQORKU SOO NOQON .....	BEFORE THE KING COMES BACK .....	16
AAN AMMAANNO RABBIGA .....	LET US PRAISE THE LORD .....	17
AANNU MADIIXNO .....	LET US GLORIFY HIM .....	18
ADIGAA IFTIINKAYGA .....	YOU ARE MY LIGHT .....	19
CIISE KIRISTOOS .....	JESUS CHRIST .....	19
GABANKII EEBBE .....	THE SON OF GOD .....	21
RABBIGA AAMMINOO .....	BELIEVE IN THE LORD .....	21



## **HIBEYN**

Buuggan qasiiddooyinka ah waxaa loo hibeeyay shahiid Soomaali Masiixi caan ah, Prof. Xaaji Maxamed Xuseen Axmed (01 Janaayo 1951 – 03 Abriil 1996). Xaaji waa la afduubay, la jir dilay kadibna lagu toogtay Xamar sababo la xiriira caqiidadiisa Masiixiyadda ah. Xaaji waxaa uu ka qalin jebiyay Jaamacadda Saskatchewan, Saskatoon, Saskatchewan, Kanada. Waxaa uu bare ka ahaa Jaamacadda Lafoole oo qayb ka ah Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed. Markii uu shahiidayay waxaa uu dib u dhis ku samaynayay nidaamka waxbarasho ee Soomaaliya. Waxaa aad loogu xusuustaa Xaaji maskaxdiisa cilmiyeed ee qotada dheer, howlkarnimadiisa iyo degganaantiisa.

## **DEDICATION**

This hymnal is dedicated to a prominent Somali Christian martyr, Prof. Haji Mohamed Hussein Ahmed (01 January 1951 – 03 April 1996). Haji, as he was better known, was kidnapped, tortured, and then executed for his Christian faith in Mogadishu, Somalia. Haji, a graduate of Saskatchewan University, Saskatoon, Saskatchewan, Canada, taught at Lafoole College, which is part of the Somali National University. At the time of his martyrdom, Haji was rebuilding the education system in Somalia. He is best remembered for his keen academic mind, work ethic, and humility.

## QASHIDDOOYINKA & QORAYAASHA

1. Haye Aan Ammaanno  
Aadan Jimcaale Faarax †
2. Duceeya  
Maxamed Cabdi Cawad
3. Ciise Wuu Imanayaa  
Maxamed Cabdi Cawad
4. Ilaah Aan Baahane  
Cabdulqaadir Mursal †
5. Ilaahay Waa Raxiim  
Maxamed Cabdi Cawad
6. Kaalaya Aan Ammaannee  
Cali Ibraahim Axmed †
7. Baaqiga Eebbow  
Aadan Jimcaale Faarax †
8. Qoraalku Sidii Uu Yidhi  
Maxamed Cabdi Cawad
9. Gacmahaaga Noo Fidi  
Amin Cabdulqaadir Axmed
10. Waxaan Ahay Dembiile  
Maxamed Bile “Islow”
11. Toobadda Rabbi  
Maxamed Cabdi Cawad
12. Guullow Ilaahow  
Aadan Jimcaale Faarax †
13. Xalay Baan Masiixii Arkoo  
Cabdulqaadir Mursal †
14. Ciise Waa Masiix  
Maxamed Cabdi Cawad
15. Nuurkii Adduunka  
Cali Ibraahim Axmed †
16. Aabbow Hana Dayrin  
Cabdulqaadir Mursal †
17. Bashirow Masiixii  
Cabdulqaadir Mursal †

## HYMNS & COMPOSERS

1. Let Us Praise Him  
Aadan Jimcaale Faarax †
2. Pray  
Maxamed Cabdi Cawad
3. Jesus is Coming  
Maxamed Cabdi Cawad
4. The God Who Has No Need  
Cabdulqaadir Mursal †
5. God is Merciful  
Maxamed Cabdi Cawad
6. Come, Let Us Magnify Him  
Cali Ibraahim Axmed †
7. The Immortal God  
Aadan Jimcaale Faarax †
8. As the Scriptures Say  
Maxamed Cabdi Cawad
9. Stretch Out Your Hands to Us  
Amin Cabdulqaadir Axmed
10. I Am a Sinner  
Maxamed Bile “Islow”
11. Repent to the Lord  
Maxamed Cabdi Cawad
12. Victorious God  
Aadan Jimcaale Faarax †
13. I Saw the Messiah Last Night  
Cabdulqaadir Mursal †
14. Jesus is the Messiah  
Maxamed Cabdi Cawad
15. The Light of the World  
Cali Ibraahim Axmed †
16. Do Not Forsake Us, Father  
Cabdulqaadir Mursal †
17. The Good New Messiah  
Cabdulqaadir Mursal †

18. Baryada Rabbiga  
Abuukar Yuusuf †

19. Maanta Noo Miciin  
Cabdulqaadir Shaatoos

20. Maryamoo  
Cabdulqaadir Mursal †

21. Qalbigaygaa Ku Doortay  
Cabdulqaadir Mursal †

22. Intuu Boqorku Soo Noqon  
Cabdulqaadir Mursal †

23. Aan Ammaanno Rabbiga  
Cabdulqaadir Shaatoos

24. Aannu Madiixno  
Aadan Jimcaale Faarax †

25. Adigaa Iftiinkayga  
Aadan Jimcaale Faarax †

26. Ciise Kiristoos  
H. Warren Modricker †

27. Gabankii Eebbe  
Cabdulqaadir Mursal †

28. Rabbiga Aamminoo  
Cabdulqaadir Shaatoos

18. The Lord's Prayer  
Abuukar Yuusuf †

19. Help Us Today  
Cabdulqaadir Shaatoos

20. Mary  
Cabdulqaadir Mursal †

21. My Heart Chose You  
Cabdulqaadir Mursal †

22. Before the King Comes Back  
Cabdulqaadir Mursal †

23. Let Us Praise the Lord  
Cabdulqaadir Shaatoos

24. Let Us Glorify Him  
Aadan Jimcaale Faarax †

25. You Are My Light  
Aadan Jimcaale Faarax †

26. Jesus Christ  
H. Warren Modricker †

27. The Son of God  
Cabdulqaadir Mursal †

28. Believe in the Lord  
Cabdulqaadir Shaatoos



## HORDHAC

Qasiiddooyinka buuggan ku jira waxaa intooda badan la daabacay 1993 waxaana lagu daabacay Nairobi, Kenya. Waxaa qasiiddooyinkaas daabacay English Press waxaana loo daabacay Codka Nolosha Cusub. Qasiiddooyinkan iyo kuwo kale oo qiima badanba waxaa laga heli karaa mareegta Nolosha Cusub, [Nolosha Cusub](http://NoloshaCusub.com).

Qasiiddooyinkan waxaa alifay halkaraanno Soomaaliyeed oo caan ka ah kiniisadda Soomaaliyeed sida Aadan Jimaacle Faarax. Qofka keliya ee qasiiddoyahanka ah ee aan Soomaaliga ahayni waa H. Warren Modricker (1907 - 1998) oo ka mid ah aabbayaasha kiniisadda Soomaaliyeed.

Ma sahlana in la turjumo suugaan sideedaba waayo waxaa lumaya in badan oo ka mid ah nuxurka iyo macaanka maansadaas. In luqad kale lagu turjumo maanso waxay u dhigantaa cusbo la dhaqay oo kale oo tiro iyo tayaba hoos u dhac ku yimaad. Si kastaba ha ahaatee waxaan sameeyay dadaal intii aan awooday. Sida ka muuqata buuggan, uma turjumin qasiiddooyinkan si toos ah (literal) balse waxaan u turjumay si macnaha dhowrta (dynamic).

Waxaan halkan uga mahadnaqayaa cid walba oo qayb ka gaysatay soo saarista buuggan qiimaha leh. Waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa Rev. LeCrecia M. Ali oo shaqal tirtay turjumidda afka Ingriiska. Eebbe haka abaalmariyo xoogga iyo xigmadda ay howshan ku bixisay. Wixii habacsanaan ah ee ka yimaad turjumidda waa mid aniga ii gaar ah oo aan cidna ila wadaagin. Nuqul PDF ah waxaad si lacag la'aan ah uga heli kartaa internet-ka.

Wixii talo iyo tusaale ah waxaad iigu soo hagaajin kartaan [amazingwisdom@gmail.com](mailto:amazingwisdom@gmail.com).

Aweis A. Ali

## INTRODUCTION

Most of the hymns in this book were first published in Nairobi, Kenya, in 1993 by English Press. They were published for Codka Nolosha Cusub (Voice of the New Life). These and many other valuable hymns are available at the Nolosha Cusub website, [Nolosha Cusub](http://NoloshaCusub.com).

The hymns were composed by talented Somali hymnists recognized in the Somali church. These hymnographers include Aadan Jimcaale Faarax. The only non-Somali hymnist in this book is H. Warren Modricker (1907 - 1998), who is one of the fathers of the Somali church.

Translating poetry is not easy because it loses its rhyme and beauty. Translating poetry is akin to washing salt, compromising its quality and quantity. However, I have done my best. As you can see in the book, the translation is not literal but dynamic.

I am thankful to everyone who contributed to the production of this great hymnal. Thanks to Rev. LeCrecia M. Ali for editing and proofreading the English translation. May God reward her richly for her effort and wisdom. Any shortcoming in this translation is entirely mine.

A soft copy (PDF) of this hymnal is available online for free.

Feel free to send me any feedback through [amazingwisdom@gmail.com](mailto:amazingwisdom@gmail.com).

Aweis A. Ali

---

## **QIRASHADA IIMAANKA**

Waxaan rumaysannahay Eebbaha Aabbaha ah  
Kaas oo ah Qaadirka abuuray samada iyo dhulka  
Iyo Ciise Masiix oo ah Inankiisa qura iyo  
Sayidkeenna  
Kaas oo ka dhashay Ruuxa Qudduuska ah  
Waxaana dhashay Maryan oo bikra ah  
Waxaa uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos  
Iskutallaabta ayaa lagu qodbay, wuu geeriyooday,  
Iana aasay  
Wuxuu galay Goobtii Dadka Geeriyooday  
Kuwii dhintay ayuu ka soo sarakacay maalintii  
saddexaad  
Wuxuu aaday samada oo uu ku negaaday isaga oo  
ku sugan  
Gacanta midig ee Eebbaha Aabbaha Qaadirka ah  
Halkaas ayuuna ka iman doonaa si uu u xukumdo  
Kuwa nool iyo kuwa dhintayba.  
Waxaan rumaysannahay Ruuxa Qudduuska ah  
Kiniisadda Ciise Masiix ee caalamiga ah  
Jameecada awliyada ah, cafinta dembiga  
Sarakiicidda jirka iyo nolosha weligeed ah

-Somali translation by Aweis A. Ali

## **DUCADA ADEEGAYAASHA EEBBE**

Eebboow Ilaahow, kuwa aad u yeertay  
In ay Eraygaaga, Soomaalida u geeyaan  
Ku adeecay adigee, ammarkaaga raacay  
Howshu waa mid adagoo, sahal aan ahayne  
Afka waxay ka doonaan, uurka uga baahdaan  
Eebboow Allaw sii, adey kuu adeegaan

Agab waxay u baahdaan, yaaney waayin Eebboow  
Ka ilaali cuduroo, caafimaad adigu sii  
Cidla yaanay aragoo, abidkood ay ciishoon  
Ehel iyo asxaab sii, halkii ay tagaanba  
Afka markay furayaan, hadal adigu oo hag  
Axadkii maqlaaba, ha raaco Injiilka

Kuwa Eraygaaga, raaca oo rumeeya  
Oo towbad keena, bartana Injiilka  
Waa xertaadi adigee, garabkood Allow gal  
Ka xijaab shar oo idil, oo ku xooji Ruuxa  
Miro badan Allow sii, ku addeeca adigoo  
Eraygaaga baraya, Soomaali oo idil

Aweis A. Ali

## **APOSTLES' CREED**

I believe in God, the Father almighty,  
creator of heaven and earth.  
I believe in Jesus Christ, his only Son, our Lord,  
who was conceived by the Holy Spirit  
and born of the virgin Mary.  
He suffered under Pontius Pilate,  
was crucified, died, and was buried;  
he descended to hell.  
The third day he rose again from the dead.  
He ascended to heaven  
and is seated at the right hand of God the Father  
almighty.  
From there he will come to judge the living and  
the dead.  
I believe in the Holy Spirit,  
the holy catholic church,  
the communion of saints,  
the forgiveness of sins,  
the resurrection of the body,  
and the life everlasting. Amen.

## **PRAYER FOR MINISTERS**

O God, the people You called  
To evangelize the Somalis,  
Those who obey and evangelize,  
Their ministry is hard. It is not easy.  
Anything they want in their hearts,  
O God, give it to them; they serve You.

May they receive anything they need.  
Protect and keep them healthy.  
Shield them from loneliness and anguish.  
Give them family and friends everywhere.  
Speak through them as they communicate.  
May anyone who hears them follow You.

The people who believe in and follow You,  
Those who repent and study the Bible,  
Help them; they are Your disciples.  
Strengthen them with the Holy Spirit.  
Give them many converts who obey You  
Those who teach Somalis about Your Word.

Aweis A. Ali

---

## **BARYADA RABBIGA**

Matayos 6:9-13

Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan. Oo jirraabadda ha noo kaxaynin, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamin.

## **SABUURKII NEBI DAA'UUD**

Sabuur 23:1-6

Kanu waa sabuur Daa'uud tiriyey.  
Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.  
Wuxuu i fadhiisiyaa doog qoyan dhexdiis,  
Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda.  
Naftayda wuu soo celiyaa.  
Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada.  
In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada,  
Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa,  
Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.  
Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu diyaarisaa miis,  
Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buuxdhaafaa.  
Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis,  
Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

## **THE LORD'S PRAYER**

Matthew 6:9-13 (NIV)

“This, then, is how you should pray:  
“Our Father in heaven,  
hallowed be your name,  
your kingdom come,  
your will be done,  
    on earth as it is in heaven.  
Give us today our daily bread.  
And forgive us our debts,  
    as we also have forgiven our debtors.  
And lead us not into temptation,  
    but deliver us from the evil one.’

## **A PSALM OF DAVID**

Psalm 23:1-6

The Lord is my shepherd, I lack nothing.  
He makes me lie down in green pastures,  
he leads me beside quiet waters,  
    he refreshes my soul.  
He guides me along the right paths  
    for his name's sake.  
Even though I walk  
    through the darkest valley,  
I will fear no evil,  
    for you are with me;  
your rod and your staff,  
    they comfort me.  
You prepare a table before me  
    in the presence of my enemies.  
You anoint my head with oil;  
    my cup overflows.  
Surely your goodness and love will follow me  
    all the days of my life,  
and I will dwell in the house of the Lord  
    forever.

---

## TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE

Baxniintii 20:3-17

Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan. Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah masayr, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda xajiya.

Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.

Xusuuso maalinta sabbtida, inaad quduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakeeyey maalintii sabbtida ahayd oo quduus uga dhigay. Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo.

Waa inaanad qudh gooyn.

Waa inaanad sinaysan.

Waa inaanad waxba xadin.

Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.

Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.

## THE TEN COMMANDMENTS

Exodus 20:3-17 (NIV)

“You shall have no other gods before me.

“You shall not make for yourself an image in the form of anything in heaven above or on the earth beneath or in the waters below. <sup>5</sup> You shall not bow down to them or worship them; for I, the Lord your God, am a jealous God, punishing the children for the sin of the parents to the third and fourth generation of those who hate me, <sup>6</sup> but showing love to a thousand generations of those who love me and keep my commandments.

“You shall not misuse the name of the Lord your God, for the Lord will not hold anyone guiltless who misuses his name.

“Remember the Sabbath day by keeping it holy. <sup>9</sup> Six days you shall labor and do all your work, <sup>10</sup> but the seventh day is a sabbath to the Lord your God. On it you shall not do any work, neither you, nor your son or daughter, nor your male or female servant, nor your animals, nor any foreigner residing in your towns. <sup>11</sup> For in six days the Lord made the heavens and the earth, the sea, and all that is in them, but he rested on the seventh day. Therefore the Lord blessed the Sabbath day and made it holy.

“Honor your father and your mother, so that you may live long in the land the Lord your God is giving you.

“You shall not murder.

“You shall not commit adultery.

“You shall not steal.

“You shall not give false testimony against your neighbor.

“You shall not covet your neighbor’s house. You shall not covet your neighbor’s wife, or his male or female servant, his ox or donkey, or anything that belongs to your neighbor.”

---

## KITAABKA & MAANSADA

### Sabuur 96:1-3

Rabbiga gabay cusub ugu gabya,  
Dadka dhulka oo dhammow, Rabbiga u gabya.  
Rabbiga u gabya, oo magiciisa ammaana,  
Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka maalin.  
Ammaantiisa quruumaha dhexdooda ka sheega,  
Oo shuulkiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan  
ka dhex sheega.

### Sabuur 98:1-9

Rabbiga gabay cusub ugu gabya,  
Waayo, isagu wuxuu sameeyey waxyaalo yaab  
badan,  
Gacantiisa midig iyo dhudhunkiisa qudduuska  
ahuna waxay keeneen badbaado.  
Rabbigu wuxuu dadka ogeysiyeey badbaadadiisii,  
Oo xaqnimadiisiina wuxuu bayaan ugu muujiyey  
quruumaha hortooda.  
Oo wuxuu soo xusuustay naxariistiisii iyo  
aaminnimadiisii uu u qabay reerka binu Israa'iil,  
Dadka dhulka darfihiisa jooga oo dhammu way  
wada arkeen badbaadinta Ilaaheenna.  
Inta dhulka joogta oo dhammay, Rabbiga farxad  
ugu qayliya,  
Dhawaaqa, oo farxad ku gabya, oo ammaan ku  
gabya.  
Rabbiga ammaan ugu gabya idinkoo kataarad  
haysta,  
Kataarad iyo codka heeska ugu gabya.  
Boqorka Rabbiga ah hortiisa farxad kaga  
dhawaaqiya  
Turumbooyin iyo buunan.  
Badda iyo waxa ka buuxaaba ha guuxeen,  
Dunida iyo kuwa dhex deggan oo dhammuna ha  
dhawaaqeen,  
Webiyadu ha sacbiyeen,  
Oo buuruhuna dhammaantood farxad ha kaga  
gabyeen Rabbiga hortiisa,  
Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dhulka  
xukumo,  
Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo,  
Dadyowgana caddaalad.

### Efesos 5:18b-19

...laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo. Iskula  
hadla sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo  
xagga ruuxa, idinkoo gabyaya oo Rabbiga  
qalbigiinna ka ammaanaya.

## THE BIBLE & HYMNS

### Psalm 96:1-3

Sing to the Lord a new song;  
sing to the Lord, all the earth.  
Sing to the Lord, praise his name;  
proclaim his salvation day after day.  
Declare his glory among the nations,  
his marvelous deeds among all peoples.

### Psalm 98:1-9

Sing to the Lord a new song,  
for he has done marvelous things;  
his right hand and his holy arm  
have worked salvation for him.  
The Lord has made his salvation known  
and revealed his righteousness to the nations.  
He has remembered his love  
and his faithfulness to Israel;  
all the ends of the earth have seen  
the salvation of our God.  
Shout for joy to the Lord, all the earth,  
burst into jubilant song with music;  
make music to the Lord with the harp,  
with the harp and the sound of singing,  
with trumpets and the blast of the ram's horn—  
shout for joy before the Lord, the King.  
Let the sea resound, and everything in it,  
the world, and all who live in it.  
Let the rivers clap their hands,  
let the mountains sing together for joy;  
let them sing before the Lord,  
for he comes to judge the earth.  
He will judge the world in righteousness  
and the peoples with equity.

### Ephesians 5:18-19

Do not get drunk on wine, which leads to  
debauchery. Instead, be filled with the  
Spirit, speaking to one another with psalms, hymns,  
and songs from the Spirit. Sing and make music  
from your heart to the Lord,

---

## 1. HAYE AAN AMMAANNO

Aadan Jimcaale Faarax †

Haye aan ammaanno  
Haye aan ammaanno  
Ilaahii na uuntay  
Haye aan ammaanno

1. Wuu na eegayaayoo  
Na ilaaliyaayee  
Ilaahii na uuntay  
Haye aan ammaanno

2. Indhihiyo dhegaha  
Iyo afarta addin  
Isagaa na siiyee  
Haye aan ammaanno

3. Waa ayaan wanaagasane  
Alla noo inshaaree  
Haye aan ammaanno

4. “Alxamdulilaahi”  
Inta aan niraahno  
Ilaaheenna fiican  
Haye aan ammaanno

5. Intii Eraygiisa  
Addeecdo rumaysa  
Wuu abaal gudaaye  
Haye aan ammaanno

6. Intii aammintoo dhan  
Inamuu ka yeelee  
Haye aan ammaanno

7. Waa Wankii Ilaahoo  
Inna aan lahayne  
Haye aan ammaanno

8. Allabbarigeenna  
inuu noo ahaado  
Inan buu na siiyee  
Haye aan ammaanno

9. Ibliiskiyo jinniga  
Isagaa ka adagee  
Haye aan ammaanno

## 1. LET US PRAISE HIM

Aadan Jimcaale Faarax †

Let us praise Him.  
Let us praise Him.  
The God who created us  
Let us praise Him.

1. He is watching us.  
He is protecting us.  
The God who created us  
Let us praise Him.

2. Eyes, ears,  
And both legs and arms  
He gave us.  
Let us praise Him.

3. It is a good day.  
God has chosen for us.  
Let us praise Him.

4. Let us say,  
“Thanks be to God.”  
Let us praise Him,  
Our good God.

5. Those who believe and obey  
His Scriptures,  
He will reward them.  
Let us praise Him.

6. All Those who trust Him,  
He has made them His children.  
Let us praise Him.

7. He is the Lamb of God,  
Who has no blemish.  
Let us praise Him.

8. Our sacrifice  
To be made acceptable  
He gave us His Son.  
Let us praise Him.

9. Lucifer and his demons  
He is more powerful than them.  
Let us praise Him.

## 2. DUCEEYA

Maxamed Cabdi Cawad

Duceeya, duceeya  
Dadkiyow duceeya  
Duceeya, duceeya  
Dadkiyow, duceeya

1. Deeqalaha ina uumay  
Inuu dembigenna  
innaga wada daayo  
Dadkiyow duceeya
2. Masiixa la doortay  
Daruurta sideeda  
U soo degi doonaa  
Digriga ugu heesaa
3. Masiixa darteenna  
Dhammaan dembigenna  
Dushiisa ku qaatay  
Damiirka u sheega
4. Markay deldeleenna  
Dhiiggiisii u daatay  
Dadkiisa jacaylka  
Cadaab ka difaacay
5. Midkii dunidoo dhan  
Iftiinka ku daaray  
Dabbaaldeg u muuja  
Ammaan ugu deeqa
6. La doona La doona  
Dadkeenna la doona  
La doona La doona  
Dadkeenna la doona
7. Kitaabka la doona  
Injiilka la doona  
Wanaagga la doona  
Iftiinka la doona

Duceeya, duceeya  
Dadkiyow duceeya  
Duceeya, duceeya  
Dadkiyow, duceeya (3x)

## 2. PRAY

Maxamed Cabdi Cawad

Pray, pray,  
Believers, pray.  
Pray, pray,  
Believers, pray.

1. The God, who created us,  
To forgive  
All our sins  
Believers, pray.
2. The chosen Messiah,  
Who like the cloud,  
Will descend to Earth,  
Sing to Him a hymn.
3. Because of us, the Messiah,  
Who took away all our sins  
And placed them upon Himself,  
Tell this to your conscience.
4. When they crucified Him,  
His blood was shed,  
For His beloved people.  
He saved them from hell.
5. The One, who, all over the world,  
Illuminated with His light,  
Celebrate Him,  
And give Him glory.
6. Help them. Help them.  
Help our people.  
Help them. Help them.  
Help our people.
7. Help them with the Holy Bible.  
Help them with the Gospel.  
Help them to get that which is good.  
Help them with the Light.

Pray, pray,  
Believers, pray.  
Pray, pray,  
Believers, pray.

---

### 3. CIISE WUU IMANAYAA

Maxamed Cabdi Cawad

1. Ciise wuu imanayaa  
Ciise wuu imanayaa  
Ilaahay baa sheegayoo  
Ereygu been ma aha oo  
Inanka kii diidayow  
Ayaanti way dhowdahoo  
Ciise wuu imanayaa  
Ciise wuu imanayaa
2. Eebbe wuxuu diiday buu  
Eebbe wuxuu diiday buu  
Uunka yidhi daaya oo  
Eebbe wuu nici jiroo  
Waa ammaan inaan xusnoo  
Ayaantii way dhowdahoo  
Ciise wuu imanayaa  
Ciise wuu imanayaa.
3. Ummadda wuu doonayoo  
Ummadda wuu doonayoo  
Wuu asxaan fali jiroo  
Addimo kaan haysan buu  
Orod yidhoo socon jiroo  
Ayaantii way dhowdahoo  
Ciise wuu imanayaa  
Ciise wuu imanayaa.
4. Kii indhaha waayey buu  
Kii indhaha waayey buu  
Aragtidiisa u furoo  
Waa Amiirka runta oo  
Aayado muujiyoo  
Ayaantii way dhowdahoo  
Ciise wuu imanayaa  
Ciise wuu imanayaa
5. Waa albaabkii jannada  
Waa albaabkii jannada  
Kii muftaaxa u aho  
Kii inkiray baa lumoo  
Naarta ku asqoobayoo  
Ayaantii way dhowdahoo  
Ciise wuu imanayaa  
Ciise wuu imanayaa

### 3. JESUS IS COMING

Maxamed Cabdi Cawad

1. Jesus is coming,  
Jesus is coming.  
God stated this  
And his Word is not false.  
Those who reject the Son  
Their day is near.  
Jesus is coming,  
Jesus is coming.
2. What God forbid,  
What God forbid,  
And prohibited from people  
God forbids what is not good.  
It is good we commemorate Him.  
The day is near.  
Jesus is coming,  
Jesus is coming.
3. He loves the people,  
He loves the people,  
He is kind to them.  
To the physically disabled  
He said, "Walk!" and they did.  
The day is near.  
Jesus is coming,  
Jesus is coming.
4. To the blind one,  
To the blind one,  
He gave back his sight.  
He is the true Prince  
Who worked miracles.  
The day is near.  
Jesus is coming,  
Jesus is coming.
5. He is the way to Heaven  
He is the way to Heaven.  
He is the key to Heaven.  
He, who denies Him, is lost,  
And he will be lost in hell.  
The day is near.  
Jesus is coming,  
Jesus is coming.



---

#### 4. ILAAH AAN BAAHANE

Cabdulqaadir Mursal †

Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Aadaan ku baahannahaye noo bishaaree

1. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Ba'a lagu sheegay aakhiro naga badbaadi
2. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Qiyaamaha baaska yaallaa naga badbaadi
3. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Xisaab ba'an baa la sheegee naga badbaadi
4. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Aadaan boqorow ku barinee naga badbaadi
5. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Belaayada taal aduunyada naga badbaadi
6. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Inaan baadiyowno Eebow naga badbaadi
7. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Inaan bidciyowno Eebow naga badbaadi
8. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Masiix inaan ka baydhnaa naga badbaadi
9. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Bakhti iyo booli iyo been naga badbaadi
10. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Bushii iyo baahi iyo ceeb naga badbaadi
11. Ilaah aan baahane loo baahan yahayow  
Baybalkoo aan ka boodnaa naga badbaadi

#### 4. THE GOD WHO HAS NO NEED

Cabdulqaadir Mursal †

The God who has no need but is needed by all,  
The God who has no need but is needed by all,  
We need you. Give us good news.

1. The God who has no need but is needed by all,  
The destruction on the last day save us from it.
2. The God who has no need but is needed by all,  
The terrible Judgement Day rescue us from it.
3. The God who has no need but is needed by all,  
A hard judgment has been foretold. Rescue us  
from it.
4. The God who has no need but is needed by all,  
We beg you, O King, save us from it.
5. God, you have no need but you are needed,  
The disasters in the world save us from them.
6. The God who has no need but is needed by all,  
All sorts of misleading, O God, protect us from  
it.
7. The God who has no need but is needed by all,  
All heretical teachings, O God, protect us from  
them.
8. The God who has no need but is needed by all,  
Rejecting the Messiah, protect us from it.
9. The God who has no need but is needed by all,  
From filth, loot, and lies, save us from them.
10. The God who has no need but is needed by all,  
From sickness, hunger, and shame, save us from  
them.
11. The God who has no need but is needed by all,  
Ignoring the Bible, save us from it.

---

## 5. ILAAHAY WAA RAXIIM

Maxamed Cabdi Cawad

1. Raxmaankeygaan jecelahay  
Riyaan ku arkay isaga  
Rubadku wuu ii farxaa  
Malaa'igo ruxubo ah baa  
Raabraabo u soo degoo  
Runtii bay ku heesayaan  
Ilaahay waa Raaxim (2x)
2. Rajaan la farxaa anigu  
Risiq Eebbaan cunaa  
Rafaad weligay ma galo oo  
Jannada rooxada ku taal  
Ayaan ku riyaaqayoo  
Raxmad Eebbaan fishaa  
Ilaahay waa Raaxim (2x)
3. Ruuxaan ka samaysanahay  
Rabbuuna xaggii ka yimid  
Ramaadkiyo doogga baxa  
Caanaha ramadka ee la dhamo  
Raaxada hurdada ee la tago  
Casiiskaa inoo rakibay  
Ilaahay waa Raxiim (2x)

## 6. KAALAYA AAN AMMAANNEE

Cali Ibraahim Axmed †

1. Rabbi baa awood leh  
Aayo iyo khayr badan  
Ilwaad iyo sharaf leh  
Kaalaya aan ammaanree
2. Rabbi baa adkaan leh  
Caqli aan go'ayn iyo  
Ilays aan damayn leh  
Kaalaya aan ammaanree
3. Adduunkuu badbaadshoo  
Dembigeennii aawgii  
Isagaa u iishee  
Kaalaya aan ammaanree
4. Ibliiskiyo jinniga  
Aadanaha lumiyaa  
Isagaa ka adagee  
Kaalaya aan ammaanree

## 5. GOD IS MERCIFUL

Maxamed Cabdi Cawad

1. I love my Merciful One.  
I saw Him in a dream.  
My heart rejoices within me,  
As I see a host of angles  
Descending in small groups  
While singing the truth that  
God is merciful. (2x)
2. I rejoice in hope  
And live by God's provisions.  
I am protected from misery.  
The beautiful Heaven  
Makes me joyful.  
I expect God's grace  
God is merciful. (2x)
3. I am made of spirit  
That came from God.  
The fresh and green grass,  
The fresh milk of livestock,  
And the pleasure of the sleep at night  
Have been bestowed on me by God.  
God is merciful. (2x)

## 6. COME, LET US MAGNIFY HIM

Cali Ibraahim Axmed †

1. The Lord is mighty.  
He gives grace and blessing.  
He is generous and honorable.  
Come, let us magnify Him.
2. The Lord is victorious,  
Has infinite wisdom  
And eternal light.  
Come, let us magnify Him.
3. He saved the world.  
Because of our sins  
He died on the cross.  
Come, let us magnify Him.
4. Lucifer and his demons  
Who lead people astray  
The Lord is mightier than them.  
Come, let us magnify Him.

5. Ninkii Ruuxa aammina  
Rabbiigiis addeecaa  
Axdi baa u yaallee  
Kaalaya aan ammaannee

6. Kii amarka raacee  
Ilaahii rumeeyaa  
Axdi baa u yaallee  
Kaalaya aan ammaannee

7. Arxankeennii weeyaan  
Ayaan Eebbe weeyaan  
Aakhiriyo adduunkee  
Kaalaya aan ammaannee

### 7. BAAQIGA EEBBOW

Aadan Jimcaale Faarax †

Baaqiga Eebbow  
Dunida beeray  
Ballan kuu sheegay  
Ka baaqan mayo

1. Buuraha korkooda  
Haddaan bil joogo  
Barafku i garaacana  
Beenbeenin maayo  
Badbaadshahayga

2. Boqol sano  
Haddaan ban joogo  
Beer iyo xooliyo  
Bilcaanba waayana  
Beenbeenin maayo  
Badbaadshahayga

3. Haddii lay bireeyo  
Bad laygu tuuro  
Bur layla dhacana  
Beenbeenin maayo  
Badbaadshahayga

4. Haddii aan baahdo  
Beesa aan waayo  
Beenbeenin maayo  
Badbaadshahayga

5. He who trusts in the Spirit  
And obeys His Lord,  
He is in God's Covenant.  
Come, let us magnify Him.

6. He who obeys the Lord  
And believes in God,  
He is in divine Covenant.  
Come, let us magnify Him.

7. He is our kind One.  
It is the day of God  
Both in Heaven and on earth.  
Come, let us magnify Him.

### 7. THE IMMORTAL GOD

Aadan Jimcaale Faarax †

The immortal God,  
Who created the world,  
Gave you a Covenant  
That will never fail.

1. On top of the mountains,  
If I stay for a month  
With snow falling on me,  
I will not deny  
My Savior.

2. For a hundred years,  
If I stay in the desert,  
Without a farm, livestock  
And spouse,  
I will not deny  
My Savior.

3. If I am decapitated,  
Thrown into the sea,  
And beaten with a club,  
I will not deny  
My Savior.

4. If I am hungry  
And I have no money,  
I will never deny  
My Savior.

5. Bugtaa i haysa  
Beerkay xanuunjin  
Isagaa i baanto  
Iga bogsiya  
Beenbeenin maayo

Baaqiga Eebow  
Dunida beeray  
Ballan kuu sheegay  
Ka baaqan maayo

## 8. QORAALKU SIDII UU YIDHI

Maxamed Cabdi Cawad

1. Qoraalku sidii uu yidhi  
Qoraalku sidii uu yidhi  
Qiyaas Rabbi baa u dhigan  
Intaan ifku qaybsamin  
Qudhiinuna taagan tahay  
Qayaamuhu aanu dhicin

Ilaahay maad qirtaan?  
Qawlkiisa rumaysataan?  
Ilaahay maad qirtaan?  
Qawlkiisa rumaysataan?

2. Quruumaha dunida jira  
Quruumaha dunida jira  
Inkastoo quwodo is bidaan  
Mar baa laga qaban naftoo  
Dhammaan laga qaadayaa  
Intaydaan wada qallalin

Ilaahay maad qirtaan?  
Qawlkiisa rumaysataan?  
Ilaahay maad qirtaan?  
Qawlkiisa rumaysataan?

3. Qaynuunku sidii uu yidhi  
Qaynuunku sidii uu yidhi  
Ducada kii aan qadderin  
Salaaddana qiimo siin  
Qaadirka uma tegi karoo  
Kii oon Sayidka u qasdiyin

Ilaahay maad qirtaan?  
Qawlkiisa rumaysataan?  
Ilaahay maad qirtaan?  
Qawlkiisa rumaysataan?

5. When I am sick  
And have pain in my liver,  
He cares for me  
And heals me from it.  
I will never deny my Savior.

The immortal God,  
Who created the world,  
Gave you a Covenant  
That will never fail.

## 8. AS THE SCRIPTURES SAY

Maxamed Cabdi Cawad

1. As the Scriptures say,  
As the Scriptures say:  
There is a unique, divine time,  
Before the world is judged,  
While you are still alive,  
And Doomsday has not come yet.

Why don't you believe in God?  
And believe in His Word?  
Why don't you believe in God?  
And believe in His Word?

2. The nations in the world,  
The nations in the world,  
Who may think they are mighty,  
One day they lose their life.  
They will all die.  
So before you all die,

Why don't you believe in God?  
And believe in His Word?  
Why don't you believe in God?  
And believe in His Word?

3. As the Bible says,  
As the Bible says,  
The one who values no devotions  
Nor gives priority to prayers,  
Will not see the Almighty,  
If his aim is not the Lord.

Why don't you believe in God?  
And believe in His Word.  
Why don't you believe in God?  
And believe in His Word?

---

## 9. GACMAHAAGA NOO FIDI

Amin Cabdulqaadir Axmed

1. Dembigaan galeyniyo  
Waxaan geysannoo idil  
Giddi waan ka beyrnnoo  
Xaqii baanuu garannaye (2x)

Guullow Allahayow  
Goor iyo ayaanba  
Gacmahaaga noo fidi (2x)

2. Golihii Iblayskiyo  
Gudcurkii inaan  
Ugu noqon gadaalbuu  
Naga yahay go'aankee (2x)

3. Nimcadaada guud iyo  
Kuwaan garan Injiilka  
Inuu Erayga gaaraan  
U gallaa socdaalkee (2x)

4. Gabbalkii dhacay iyo  
Waagi soo guduutaba  
Noogu deeq gargaarkiyo  
Raxmaddaada gaarka ah

## 10. WAXAAN AHAY DEMBIILE

Maxamed Bile "Islow"

1. Waxaan ahay dembiile  
Waxaan ahay dembiile  
Dunuubtii aan falay baa  
Dunuubtii aan falay baa  
Daraaddeed, laguugu qodbay iskutallaabtee  
Daraaddeed, laguugu qodbay iskutallaabtee

2. Waxaan ahay dembiile  
Waxaan ahay dembiile  
Dulmigaan samey baa  
Dulmigaan samey baa  
Daraaddiis laguugu qodbay iskutallaabtee  
Daraaddiis laguugu qodbay iskutallaabtee

3. Waxaan helay dembidhaafka  
Waxaan helay dembidhaafka  
Nolol daa'ima inaan helo  
Nolol daa'ima inaan helo  
Daraaddeed laguugu qodbay iskutallaabtee  
Daraaddeed laguugu qodbay iskutallaabtee

